## Kafiilka hoos yimaada Heerka 1 – Qaybta Taageerada Qoyska Qaxootiga

## Hagaha ku codsiga

Fiiro gaar ah: adiga ayaa ah kafaala qaadka.

**FOOMKA ISDIIWAANGELINTA**

Buuxi Foomka Isdiiwaangelinta "Qaybta Taageerada Qoyska Qaxoontiga ee Heerka Koowaad Foomka Isdiiwaangelinta Kafiilka" **(INZ1094).**

> **MUHIIM**
>
> Markaad gaadho Qaybta F ee foomka, waxaad arki doontaa caddaynta kafaala-qaadka. Waa inaad caddayntan ku hor saxeexdaa qareen ama JP.

**DUKUMIINTIYADA**

Waxaa lagu weydiin doonaa inaad soo dirto dukumeenti muhiim ah oo wata codsigaaga, sida baasaboorkaaga. HA SOO dirin dukumentiyada asalka ah. Soo dir *nuqullo la xaqiijiyay*.

> **NUQULLADA LA XAQIIJIYAY** – waa koobiyo la shaabadeeyey oo uu saxeexay qareen, Garsoorka Nabadda, ama nootaayo dadweyne si uu u caddeeyo in uu yahay nuqul dhab ah oo dukumintiga asalka ah.

**DEGENAANSHAHA AMA MUWAADINNIMADA NZ**

Waa inaad soo lifaaqdaa nuqulka la sharciyeeyay ee: *nuqulla la xaqiijiyay* ee:

- Fiisaha degenaanshaha ee baasaboorkaaga, ***ama***
- Fiisaha daganaanshaha ee ku jira dukumeentiga safarka qaxootiga, ***ama***
- Shahaadada muwaadinimada ama baasaboorkaaga NZ (Haddii aad tahay muwaadin NZ).

**WAALIDIN KELI AH / XANAANEYAHA KELIYA**

Haddii aad tahay waalid keligiis ah oo ku nool NZ ama xannaaneeyaha keligiis ah ee qaraabada kugu tiirsan, waxaad u baahan doontaa inaad ku lifaaqdo cadaymo ku saabsan. Tani waxay noqon kartaa warqad ka timid Shaqada & Dakhliga oo dhahhaysa waxaad ka helaysaa Faa'iidada Waalidka Keliga ah ama GP-gaaga oo sheegaya inaad tahay xannaaneeyaha qofka qaraabada ah ee ku tiirsan.

**HADDII AAD MAGACAAGA BEDDESHAY**

Haddii aad magacaaga bedeshay tan iyo markii aad timid New Zealand, waxaad u baahan doontaa inaad ku lifaaqdo ***bayaan sharci*** oo xaqiijinaya isbeddelka. Nala soo xiriir si aan kaaga caawino arintan.

**DIRIDA CODSIGA**

Marka la dhammeyo. Ku dheji *foomka Qaybta Taageerada Qoyska ee Qaxoontiga*, iyo dhammaan dukumeentiyada ku lifaaqan:

Qeybta Taageerada Qoyska Qaxootiga ee Socodaalka New Zealand

Sanduuqa Boostada 22315

Otahuhu

Auckland 1640.

## Warbixin muhiim ah

**LACAG**

Qoyska aad kafaalo qaaday ***lama*** siin doono taageero dhaqaale oo la mid ah tan qaxootiga kootada ah.

Adiga (kafiil-bixiyeha) ***waa inaad*** bixisaa kharashka hoyga qoyskaaga 24 bilood (2 sano) ka dib markay yimaadaan NZ. Uma baahnid inaad hadda u heyso guri, laakiin marka fiisuhu ku soo dhawaado in lagu siiyo, Laanta Socdaalka waxay doonaysaa inay ku aragto inaad qoyskaaga u hayso qorshe hoy. Tusaalooyinka caadiga ah waxaa ka mid ah caddaynta inaad haysatid kayd ku filan oo aad guri u kiraysato qoyskaaga. Ama ogolaansho laga helo milkiilaha guriga si ay kula noolaadaan, ama qoys kale oo guri leh.

Manfac degdeg ah ayaa loo heli kara Qoysaska marka ay yimaadaan New Zealand. Uma ***qalmi*** doonaan in ay helaan kaabida hoyga.

Waa in aad bixisid kharashka wixii dukumeenti ah ee codsiga looga baahan yahay. Sida shahaadooyinka booliiska, waraaqaha dhalashada, baasaboorada, iyo turjumaada.

**Socdaalka ayaa bixinaya kharashka ku baxaya diyaaradaha iyo caafimaadka.** Ma jiraan wax lacag ah oo

**MUHIIM**

Socdaalku wuxuu u baahan yahay inuu arko adiga oo awood u leh inaad taageerto qoyska aad kafaala qaadayso marka ay yimaadaan.

Bixiyeyaasha adeegga dejinta ayaa kaa caawin kara inaad isku dhejiso qorshahaaga hoyga, laakiin ma bixinayaan kharashyada hoyga qoyskaaga. Waa in aad hadda bilowdaa wax kaydinta.

isdiiwaangelin ah ama kharash degenaansho.

**MARKII AAD CODSATO KADIB**

Marka socdaalka uu helo codsigaaga, waxay eegi doonaan si ay u hubiyaan inaad u qalanto.  Haddii ay u aamminsan in aad u qalanto, waxay markaas kuu soo diri doonan ***casuumaad si aad ku codsato*** degananshiyo.

Qoyskaagu markaa waxay haystaan **12 bilood** si ay u codsadaan degenaansho laga bilaabo taariikhda laguu casuumay ee warqadd codsiga.

Ma jirto wax kordhin lagu sameeynayo 12-ka bilood ee kama dambaysta ah.

**Ka fiiri warbixinteena ku saabsan codsiga degenaanshaha**.

**MUHIIM**

Waxaa muhiim ah in la xasuusto casuumada codsigu uusan damaanad qaadin in qoyskaagu helayo sharciga degenaanshaha. Habka degenaanshuhu wuxuu qaataa sanado badan, waana inaad buuxisaa shuruudo dheerad ah oo badan. Ma aha hannaan degdeg ah. Khatarta ka jirta waddanka qoyskaaga uu ka soo jeedaan guud ahaan kuma filna in lagu siiyo codsigaaga mudnaanta koowaad.